

ashyaagakhatarta

Xaqiiqada: Maaddooyinka halista ah waxey khatar ku yahiin nolosha, caafimaadka ama hantida markii si khaldan loo maareeyay, taasoo keentay in ay daateen, dillaac ama sameyaan uumi sun ah oo karkaraya. Lama arki karayo had iyo goor, lamana urin karo, lamna dhadhamin karo.

Maxaa la sameeyaa:

- Dhegayso tilmaamaha ay bixinayaan masuuliyiinta maxalliga ah. Waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo in aad hoyga joogto ama aad ka qaxdo, iyadoo ku xiran tahay hadba xaaladdu sidey tahay.
- Haddii lagu warsado in aad hoyga ama guriga gabaad ka dhigato, gudaha soo geli ehelkaaga iyo xayawaanka sida eyga ama bisada. Xir albaabada, daaqadaha iyo meelaha marwaxadaha dabka laga shido. Dhig tuwaal qoyan iridda albaabka iyo meelaha furan oo kale oo ay dabeyshu ka soo geli karto. Dami marawaxadaha, qaboojiyaha iyo nidaamka diirinta hawada qasabka ah. U diyaar garowi in ad farsameyso oo aad isticmaasho waxaad gacanta ku heyso si aad u daboosho meelaha banana si aad u abuurtid wax idiin dhaxeeya adiga iyo hawada dibada ka imaaneysa.
- Haddii lagu warsado in aad qaxdo, sidaas yeel isla markiiba. Raac jidadkasto geeddiga ogeysiisku bixinayo. Qaar ka mid ah jidadka waxay yeelan karaan calaamado ku yaala dhinacyada waddooyinka iyo jidadka waaweyn.
- Haddii aad aragto wax qubanaya, meesha iskaga tago, si degana uga digo kuwa kale in ay ka fogaadaan oo wac 911 si aad u soo sheegtid dhacdada.
- Haddii aad u maleyso in aad xiriir la yeelatay kiimiko ama baayoloji iyo mukhaadaraad, wac Xarunta Xakamaynta Sunta (1-800-222-1222) ama raadso daaweynta kugu haboon.
- La soco raadiyaha si aad ula socoto akhbaraadka degdeg ah.
- ***Haddii aad garaneyso qof aan awoodin in uu fahmo, arko, ama aan maqlin farriintan, fadlan u sheeg waxa ay ku saabsantahay.***

Xiriiro kale ee ku caawinaya:

<http://mil.wa.gov/emergency-management-division/hazards/hazardous-material>

<http://www.ready.gov/hazardous-materials-incidents>

<http://www.redcross.org/prepare/disaster/chemical-emergency>